THE OHIO CENTER FOR
DEAFBLIND EDUCATION

# Waalidiinta iyo Qoysaska leh caruurta iyo dhalinyarta ee ah indhoolaha iyo dhagoolaha ah

## *Waxaad u baahantahay inaad ogaato*



Ohio Center for Deafblind Education
2021

CECH
Education
Criminal Justice
Human Services
Information Technology

Systems Development & Improvement Center

# Tusmada Nuxurka

**Kusoo dhowaaw ocDBe........................................................3**

**Qeybta I** *Qoysaskahalkee ayay ka bilaabi karaan barashada wax ku saabsan indhoole iyo dhagoole?..........................................................................................3*

**Qeybta II** *Maxey ilmaha indhoolaha iyo dhagoolaha uga dhigan tahay "wax ka qabashadahore"? ………4*

**Qeybta III** *Sidee bay qoysaska u caawin karaan ilmahoodi inay guriga wax ku bartaan?.........................................................................................................5*

**Qeybta IV** *Sidee bay qoysaska u qiyaasi karaan waxbarashada ilmahoodi ee xaga dugsiga? … … … 6*

**Qeybta V** *Waa maxay qaar ka mid ah kheyraadka dheeraadka ah?..................8*

## Ku saabsan OCDBE

Xarunta Ohio ee waxbarashada indhoole iyo dhagoole (OCDBE) waa mashruuc iskukeena caawimaad iyo farsamo oona faafiya taasoo loogu talagalay iney bixiso caawimaad waxa ku ool ah tababar, Koritaanka xirfad leh, iyo latlinta lacag la'aanta ah si loogu caawiyo wanaagsanaanta natiijada caruurta.Dhaladka ilaa 21 jir, kuwaa soo leh cilada araga iyo maqal la'aanta. OCDBE waxey masuul ka tahay iney qabtaan tirakoobka Ohio ee caruurta ee sanadlaha kuwaa soo leh cilada araga iyo maqal la'aanta.

Haddaba 30 sano ayey OCDBE la shaqeyneysey degmooyinka meel ahas iyo dugsiyadoodi, kuwa waxbara, kuwa wakiilka ah ee masuul ka ah ee keenay fikirka qeybta B iyo C, waalidka gobolada iyo qaranka iyo kuwa la xiriira xirfada, iyo kuwa badan oo wada hawgalay si ey u wanaajiyaan natiijada caruurta. Si aad u hesho warka dheeraadka ah, OCDBE at 614.897.0020, ama tag ciwaanka OCDBE oo ah www.ohiodeafblind.com.

## Mahadcelinta gaarka ah

Waxaan mahadcelinta gaarka ah u celineynaa Dr. Edwina Pendarvis kaasoo fikradihiisi ku daray markuu dib u fiiriya oo uu diyaariyay hagahaan. OCDBE sidoo kale waxey rabtaa iney u mahadceliso midka u ugu caawiya farsamo oo naqshadeeya, kuwasoo kooxdoodi dib ugu eegday hagahan ee ey jawaab caawimaad leh usoo celisay taaso ku caawisay in tani laga dhiso oo la sifeeyo

OCDBE waxa ugu horayntii lagu taageeraa tabarucaad (#H326T180011) oo ay la socoto Qaybta Cilmi-baarista Ku-dhaqanka, Xafiiska Barnaamijyada Waxbarashada Gaarka ah, Waaxda Waxbarashada ee Maraykanka. OCDBE waxay iskaashi la leedahay Xarunta Horumarinta & Wanaajinta Nidaamyada Jaamacadda Cincinnati. Taageerada dheeraadka ah ee loogu talagalay hawlaha la beegsanayo waxaa bixiya Waaxda Waxbarashada Ohio. Ma jiraan wax xaddidaad ah oo xuquuqda daabacan ah oo ku saabsan dukumeentigan. Si kastaba ha noqotee, fadlan sheeg xigashada oo xus isha marka aad koobiyaynayso dhammaan ama qayb ka mid ah dukumeentigan. Nuxurka daabacaadan waxaa lagu soo saaray deeq ka timid Waaxda Waxbarashada Maraykanka, #H326T180011. Si kastaba ha noqotee, nuxuradaan daruuri ma aha inay matalaan siyaasadda Waaxda Waxbarashada ee Maraykanka, mana aha inaad u qaadato in ay Dawladda Federaalka ku ayiday. Madaxa Mashruuca, Eric Caruso.

daabacaadan

© 2021 *The Ohio Center for Deafblind Education, University of Cincinnati Systems Development & Improvement Center.* All rights reserved.

## Kusoo dhowaaw OCDBE

Mid ka mid ah ujeedooyinka xarunta Ohio ee waxbarashada indhoole iyo dhagoole (OCDBE) waa caawinta reerka korinaya ilma leh cilada araga iyo maqalka. Buugan yar waxaa loogu talagalay inuu kugu caawiyo inaad bilawdo safarka waxbarashada ee adiga iyo ilmahaaga ey macquul kuu ahaadaan.



Waxey ku siineysaa warbixin kusaabsan waxaad sameyn lahayd markaad ogaato ilmahaaga iney leeyihiin cilada arag iyo maqal la'aanta, waxrbixin ku saabsan baahida ilmahaaga ee waxbarashada, waxrbixin ku saabsan kheyraad kugu caawiyo inuuadiga iyo ilmaha safarkaan idin ku hago.

Waxaan rajeyneynaa iney hubaal tahay inaad ogaato iney jiraan kheyraad badan ee caawimaad leh gobolka dhexdeeda ee reerkaaga oo kale.Warbixin kale waa lagu soo diri doonaa kuwa wakiilada ee adeegyada bixiya, qaarna waxey xagaaga uga baahanyihiin baaritaan. Waalidka qaar o oleh caruur leh cilada raga iyo maqal la'aanta oo ka mid ah Ohio waxey helaan waani aad ugu fiican oo ka imaata kuwa kaloo leh caruur leh cilada araga iyo maqalka.ka qeyb qaadashada tababarka, ama kulanka xarunta Ohio ee waxbarashada indhool iyo dhagool bixisa waa mid ka mid ah ee ugu fiican sida aad xiriir ula lahaan lahayd dadka wadaagi kara xaaladoodi iyo firkadahoodi.

## Qeybta I *Qoysaska halkee ayay ka bilaabi karaan barashada wax ku saabsan indhoolaha iyo dhagoolaha?*

"Idhoole iyo dhagoole" waa erey dadka wareeriya. In yar oo caruur ah ayaa ah indhool iyo dhagool. Bdanaa, ereyga ereygu wuxuu qeexaayaa ilmo leh araga maqal yar. Si loogu yiraahdo waa indhool iyo dhagool, labada cilad waa iney ahaadaan mid daran ee u baahan la qabsi ama caawimaad in caruurtu aan la ahayn araga iyo maqalka eysan u baahneyn.



Sida curiyaamada kale, indhool iyo dhagool waxey ku kala duwantahay shaqsiga. Heer walboo indhool iyo dhagool, haba ahaatee, ilma walba leh heer cilad ah ee araga iyo maqalka waxey u baahanyihiin hab gaar ah ee wax loogu baro, hab oo u fiican ilmaha si ey u heli karaan warbixinta.

Hal wax oo aad madax ku xajiso markaad safarkaann bilaabeysid waa inaad ogaatid inaadan kaligaa ahayn! Si ey tuseyso Qeybta I ilaa V, waxaa jiraa reero badan, dhakhtaryaal iyo kuwa wax bara eek u caawinaya.

Meesha fiican ee lagu baran karo wax ku saabsan indhoolnimo iyo dhagoolnimo waa halka **Xarunta Ohio ee waxbarashada indhoolaha iyo dhagoolaha (OCDBE).** OCDBE waa mashruuc ay dawlada dhexe maalgaliso kaas oo siiya kaalmada adeegyo farsamo oo bilaash ah carruurta, dhalashada ilaa da'da 21 sano jir, kuwaas oo leh isku darka arag-la'aanta iyo maqal-la'aanta, iyo waalidiinta carruurta.. Kaalmada farsamada OCDBE waxaa ka mid ah la-talinta; tababarka iyo horumarinta xirfadeed; iyo sidoo kale qalabyo kale, alaabooyin, iyo adeegyo talo bixin ah.

Tilaabada ugu horeyso ee lagula xiriiro mashruuceena waa in ilmaha la diiwaangeliyo iyadoo loo marayo ciwaankeeni oo ah www.ohiodeafblind.com. Markaad diiwaangeliso kadib , waxaad xaq u leedahay inaad adeegyada waadna bilaawi kartaa inaad xiriir la sameyso kuwa mashruuca wada, lataliyayaasha, kuwa waxbara iyo reer kaloo leh caruurta indhoole iyo dhagoole. Waxaan kuugu dhiirigelineynaa inaad la xiriirto OCDBE. Waxaan rabnaa inaan ka mid noqono safarka reerkaaga.



## Qeybta II *Maxey ilmaha indhoolaha iyo dhagoolaha uga dhigan tahay "wax ka qabashada hore"?*

Caruurta yar yar, dhaladka ilaa 3jir, oo leh cilada araga ama maqalka waxey xaq ugu leeyihiin iney helaan adeegyada dhaxgelka hore taasoo hoos imaaneyso barnaamijka dhaladka, iyo socod baradka ee waxbarashada shaqsiga ee curyaanimo Adeegyada dhaxgelka hore, waxaa loogu talagalay iney muujiyaan koritaanka ilmaha iyo baahida waxbarashada, iney aad ugu mihiimsanyihiin caruurta leh cilada araga iyo maqalka, iyo reerka. Waxa u dhaxeeya dhaxgelka hore waa qorshaha adeega ee shaqsiga ee reerka (IFSP).

Iyadoo loo maraya dhaxeeya dhaxgelka hore waa qorshaha adeega ee shaqsiga ee reerka , reerku waa iney ka mid ahaadaan iney sameeyaan hadafka ilmahooda. Dooro habka kugu caawinkara inaad gaarto hadafkaan, iyo in la go'aamiyo adeegyada loo baahanyahay in la caawiyo ilmaha iyo reerka ee maraya xaalada indhool iyo dhagoolnimo.

Kuwa ka mid ah reerka iyo kuwa adeegyada bixiya wey isla shaqeeyaa sida koox si ey u sameeyaan qorshe, sameyn, iyo qiimeyaan adeegyada gaar ah ee qoosaska walaacooda iyo waxa muhiim u ah.

Helida adeegyada dhexgelka hore oo Ohio, waad bilaabi kartaan inaad la xiriirto barnaamijka Ohio ee ah I caawi si aan u koro (800) 755-GROW (4769). Markaad la xiriirto I caawi si aan u koro, waxaa lagu weydin doonaa nala wadaag warka guudka ah eek u saabsan reerkaaga iyo ilmahaaga. Sidoo kalana waad waad sheegi kartaa welwelkaaga gaarka ah. Dhaxgelka hore Kuwa isku haga adeegyada waxaa loo hawgelinayaa iney kaa caawiyaa si aad u hesho adeegyadaan oona fahanto xaqaaga. Ciwaan waxaad ka heli kartaa halkan http://www.helpmegrow.ohio.gov/en/early%20intervention/early%20intervention.aspx.

Tusaalayaasha ee warka kheyraadka ka ku saabsan ee indhoole iyo dhagoole waa: Xarunta warka ee waalidka - https://www.parentcenterhub.org/, Xarunta qaranka ee indhoole iyo dhagoole - https://www.nationaldb.org/, Ururka qaranka ee reerka ee indhoole iyo dhagoole - https://nfadb.org/

## **Qeybta III** *Sidee bay qoysaska uga caawin karaan ilmahoodi ee inay guriga wax ku bartaan?*

Wanaajinta xaalada waxbarashada ilmahaaga adigoo jooga guriga caadi ahaan waxaa ka mid ah in laga hadlo saddex baahi ee muhiim ah:

**Baahida ku dhiirigelinta iyo ka caawinta hadalka.** Waxa reerka ugu muhiimsan waa sameynta habka wada hadalka ee u haboon baahida ilmahoodi. Habka kala duwan wuu u haboonyahay ilmaha da'doodi kalwa duwantahay waayo hadalka ilmahaagu wuu wuxuu u baahanyahay isbeddel, tignoolajiyada caawimaadka leh- sidaa kordhinta habka, caawimaada kuwa araga yar, mee qadka ah ee laga barto farta indhoolaha-aad ayey ugu muhiimyihiin koritaanka iyo xirfada hadalka ee ilmaha indhoole iyo dhagool ah.

**Waa loo baahanyahay caawimaad, qiimeynta iyo faafinta.** Caruurta badan ee indhoole iyo dhagoole ah waxey u baahanyihiin qiimeynta iyo tilmaan faafinta leh si ey ku dhex maraan degaankoodi iyagoo nabad qaba oo kalsoonina leh. Markey leeyihiinxirfad oo ey si madax banana ah u socdaan taani waxey kor u qaadeysaa kalsoonida caruurta iyo fursado bulshada dhexdeeda. Helitaanka iyo raacida qiimeynta saameyn leh iyo tilmaamaha faafiya, waanida iyo caawimaadu aad ayey u muhiimtahay koritaanka ilmahaaga.

**Waa in la xiriiriyaa guriga iyo dugsiga.** Waa muhiim in la xiriiriya guriga iyo dugsiga iyadoo isla habkii lagu isticmaalo labada meel. Caruurta aan wax arkeynin ama maqleynin waxa agtoodi ka dhacayo waxey noqon karaan kuwa walaacsan xitaa difaac ayey galaan waayo ma garanayaan waxey rajeeyaan. Raac isla habkii ee hadalka iyo waxbarashada xagga guriga iyo dugsiga sameeya waxa ey garanayaan oo kalsooni siiya ilmaha.

Marar qaar, noqoshada waalid leh ilmaha indhoole iyo dhagoole waxey tani nolol mashquul ah beddelkii safar. Dhaxgalka hore iyo xirfadaha kale iyo xoogsaarida waxbarashada iyo xooga wuxuu keenaa natiijo wanaagsan. Nasiib wanaaga, waxaa jiraa adeegyada caawiya reerka eek u caawin kara.

Red Treehouse wuxuu kugu caawin karaa inaad la xiriito oo aadna hesho war muhiim ah oo ku saabsan kheyraadka sida tababarka waalidka iyo caawimaada ilmaha la siiya. Ciwaankancan ka gal www.redtreehouse.org si aad jawaabo u hesho su'aalaha ku saabsan maadooyinkaas iyadoo ilmuhu koritaankiisu, inuu dhalo, waxbarashada, iyo caafimaad ku saleysan bulshada iyo adeegyada bulshada. Ururka qaranka ee reerka indhoole iyo dhagoole sidoo kale waxey siiyaan war iyo caawimaad qooysaska caruurtoodi kuwaasoo ah indhoole iyo dhagoole iyagoo sameynaya waxyaalo iyo ciwaanku waa https://nfadb.org. Qoysas badan ee ka mid ah Ohio waxey ku xiranyihiin haayadahan iyo /ama iyo qaran itixaad ah ee indhoole https://nfb.org/.

Haayado badan waxey diirad saaraan curyaanimo gaar ah iyo cuduro. Haayadaha qaarkood oo u noqday waalidiinta leh caruurta indhool iyo dhagool ah kuwo caawimaad ah waa dugsiga qaranka ee dhagoolnimo iyo curyaanimo kale oo hadalka https:// www.nidcd.nih.gov/, Aasaaska Cudurka dila xubnaha, http://www.chargesyndrome. org, iyo Aasaaska cudurka kiliyaha. http://alportsyndrome.org/ iyo kuwa kale.

## Qeybta IV *Sidee bay qoysaska u qiyaasi karaan waxbarashada ilmahoodi ee xaga dugsiga?*

Waalidiin badan iyo kuwa wax bara waxey fahmeen in ilmaha indhoolaha iyo dhagoolaha ah ay dunidaan kala kulmaan xaalad ka duwan caruurta kale. Kala duwanaashadaan waxey keentaa dhibaato fasalka dhexdiisa laakiin ilaa hada xirfada iyo aqoonta ku saabsan sida caruurta indhoolaha iyo dhagoolaha ee waxbaritaan ku caawin kara kalsoonida in ilmahaagu ey heli karaan degaanka waxbarashada taasoo isaga ama iyaga ku haboon.






Barashada, ee koritaanka caadiga ah ee ilmaha waxaa lagu muujiya sawirkan. Waxey muujineysaa in caruurtu badan u qiyas ahaan u baahanyihiin tilmaal la isla joogo ah. Wax badan waxey ka bartaan waxey garanayaan iyadoo loo marayo barashada kadis ah oo dhacda iyagoo arkaya waxa agtooda ka dhaca
Sidoo kale waxey wax badan ka bartaan makey dhageystaan waxa waalidka, macalinka iyo kuwa kale iyaga ku dhahaan

Barashada kadis ah aad uma faa'iidocaruurta leh cilada araga iyo maqal la'aanta.
Waayo ma heli karaan warka dareen leh, barashada sare wey adagtahay isla sababtaas darted. Barashada, ee ilmaha ah indhoole iyo dhagoole, caadi ahaan waxey qaadataa. Meel ka gaar ha- iyadoo loo marayo dhaxgelka markii la isla joogo, taasoo tagu tusay munaarada labaad.

Indoole iyo dhagoolnimo waxey muujisaa dhibaatada waxbarashada taasoo si fiican lagu sheegi karo tilmaamyada shaqsiyadeed. Dhibaatooyinkaas waxaa ka mid ah dhibaatooyin saameyn u keena barashada dugsiga dhexdiisa iyo banaankaba:

- Hadalka dhiba

- Fikrado xun, dhawaaqa, meel iyo waqti
- Rajo la'aanta waxa dhacaya iyo waxa kasoo baxa
- Dhiirigelin la'aan

Sida ey ka qeyb qaadashadaadu ee adeegyada qorshaha shaqsi ee qooyska ey muhiim u tahay dhexgelka hore, ka qeyb qaadahsada barnaamijka waxbarashada ee shaqsi ahaan ee ilmahaagu dugsiga hoose ilaa fasalka laba iyo toban sidoo kale aad ayey ugu muhiimtahay. barnaamijka waxbarashada ee shaqsi ahaan wuxuu hagaa waxbarashada ilmahaaga ee dugsiga hoose, dugsiga dhaxe iyo dugsiga sare.

Si aad u noqoto lamaane saameyn leh adigoo aqoonsanayso la qabsasho iyo adeegyada ilmahaagu ugu baahnyihiin dugsiga dhexdiisa, waa inaad ka fahantaa xaqaaga iyo kan ilmahaaga waxnarashada curiyaanka ee ficilka shaqsiga. Tani ma ahan wax sahlan, laakiin xafiiska qeybta waxbarashada ee Ohio ee caruurta gaarka ah, diyaar bey yihiin, run ahaantii, waxey u baahanyihiin, iney ku caawiyaan inaad fahanto adeegyadaan oo

aadna ilaaliso.

Hagaha waalidka ee xaqa waxbarashada gaarka ah, waxbarashada gaarka ah habraaca ilaalinta ogeysiinta (2017), waxaana sameeyay xafiiska qeybta Ohio ee waxbarashada, kuwaasoo diirad saara waxka waalidka u baahan iney ogaadaan eek u saabsan habraaca waxbarashada gaarka ah. Hagahan wuxuu faafaahiyaa xaqa ilmahaaga ah oo ah 'waxbarashada lacag la'aanta ah dadweynaha ee u haboon' iyo sida waxbarashada gaarka ah loo bixiyo iyadoo loo maraya habka dugsiga. Buuga haga waxaa laga heli karaa ciwaankan http://education.ohio.gov/Topics/Special-Education/Whose-IDEA-Is-This-A-Parent-s-Guide-to-the-Individ.

Ilmahaagu markey u dhowyihiin dugsiga sare diirad qorshahaaga waa inuu u beddelmaa xagga sameynta qorshaha isbeddelka ee ka gudubka waxbarashada dugsiga sare iyadoo qeyb ka ah barnaamijka waxbarashada ee shaqsi ah. Isbeddelkan wuxuu diirad sareyaa ka gudubka waxbarashada dugsiga sare taasoo ka mid ah(kulliyad, ama barnaamij kaloo ka gudubka dugsiga sare) shaqeynsiinta, iyo ku dhex noolaashada bulshada.

Isbeddelaku wuu u adagyahay ardeyda, haba ahaatee, ardeyda leh cilada araga iyo maqal la'aanta waxey leeyihiin baahi dheeraad ah oo ey kooxda waxbarashada ey u qaataan. Baahi ku xiriita hadalka, u doodida shaqsi ahaan, go'aan qaadasho ee shaqsi ahaan tusaale. Qorshaha isbeddelka waxey tuseysaa hadafka, qiimeynta, adeegyada loo baahanyahay in loo diyaariyo ilmaha guul dugsiga sare kadib. OCDBE waxey sameysey buuga isbeddelka ka dugubka dugsiga sare, kaasoo aad ka heli kartaan ciwaanka warka indhoole iyo dhagoole xaga OCDBE taaso lagu sheegay qeybta V.

# THE OHIO CENTER FOR DEAFBLIND EDUCATION

## Qeybta V

*Waa maxay qaar ka mid ah kheyraadka dheeraadka ah?*

Adigoo sii wado barashada indhoolaha iyo dhagoolaha, maxey u tahay reerkaagi, waxaa laga yaabaa inaad leedahay su’aalo badan.
Haayadahan soo socda iyo kuwa kale oo horey lagu soo sheegay qeybta hore ee hagahan ayaa diyaar u ah inay kaa caawiyaan sidii aad jawaabo u heli lahayd.



Xarunta Ohio ee waxbarashada indolaha iyo dhagoolaha, www.ohiodeafblind.com

Qeybta Ohio ee waxbarashada/ Xafiiska waxbarashada ee caruurta gaarka ah, www.education.ohio.gov

Isbahaysi ee Ohio ee waxbarashada caruurta curiyaanka ah, www.ocecd.org

Xarunta Ohio ee caruurta leh cilada maskaxda iyo xanuun soo lalaabanaya, www.ocali.org

Fursadaha kuwa Ohio ee curiyaanka ah, www.ood.ohio.gov Xarunta qaranka ee indhoolaha iyo dhagoolaha ah, www.nationaldb.org

Uruurka qaranka ee dhagoolaha, https://nad.org/

Haayadaha qaranka ee curiyaanka, https://www.nod.org/

**www.ohiodeafblind.com**

Systems Development & Improvement Center

Xarunta Ohio ee Waxbarashada Indhoolaha iyo Dhagoolaha waxa ugu horayntii lagu taageeraa tabarucaad (#H326T180011) oo ay la socoto Qaybta Cilmi-baarista Ku-dhaqanka, Xafiiska Barnaamijyada Waxbarashada Gaarka ah, Waaxda Waxbarashada ee Maraykanka. OCDBE waxay iskaashi la leedahay Xarunta Horumarinta & Wanaajinta Nidaamyada Jaamacadda Cincinnati. Taageerada dheeraadka ah ee loogu talagalay hawlaha la beegsanayo waxaa bixiya Waaxda Waxbarashada Ohio. Ma jiraan wax xaddidaad ah oo xuquuqda daabacan ah oo ku saabsan dukumeentigan. Si kastaba ha noqotee, fadlan sheeg xigashada oo xus isha marka aad koobiyaynayso dhammaan ama qayb ka mid ah dukumeentigan. Nuxurka daabacaadan waxaa lagu soo saaray deeq ka timid Waaxda Waxbarashada Maraykanka, #H326T180011. Si kastaba ha noqotee, nuxuradaan daruuri ma aha inay matalaan siyaasadda Waaxda Waxbarashada ee Maraykanka, mana aha inaad u qaadato in ay Dawladda Federaalka ku ayiday. Madaxa Mashruuca, Eric Caruso.